

## Kaydinta iyo isticmaalka dhiiga shaybaadka

Marka la shaybaadho dhiiga, hadhaaga dhiiga ee soo hara waxa lagu kaydshaa bangiga dhiiga ee caruurta dhalata iyada oo xogta lahaa dhiiga la qarinaldo. Meel dhigida haraaga dhiiga waxa ay suurta-gelinaysaa in shaybaad dib loo sameen karo haddii kii hore shaki ku yimaado ama baadhitaano dheeraad ah la sameenayo mustaqbalka kuwaas oo aanay dhicin in la sameeyo marka uu ilmuhu dhasho. Dhiigaas waxa kale oo loo isticmaalaa tayo dhawrka shaybaarada iyo horumarinta habab shaybaad oo cusub.

Hadhaaga dhiiga waa la baabi`iyaa 6 sano dabadeed.



(sawir-qaade: Jo Michael)



## Cusbitaalka guud ee Oslo kiliiniga dumarka iyo caruurta Baadhida caruurta dhasha

Rikshospitalet  
Sognsvannsveien 20  
Postboks 4950, Nydalen

0424 Oslo  
Tilifoon: 02770  
iimayl: nyfodtscreeningen@ous-hf.no  
Bogga: <http://www.oslo-universitetssykehus.no/nyfodtscreeningen>



Taariikh: 03.09.2015  
tafatiraad: daabacaadii 2.0

Mashruuca cilmi-baadhista ee hoos u dhaca difaaca jidhka ee khatarka ah (SCID)

Waanu baadhi jirada, waa aanu daweenna`!  
Baadhida ilmaha dhasha, kiliiniga dumarka iyo caruurta, cusbitaalka guud ee Oslo (Oslo universitetssykehus)



## Mashruuca cilmi-baadhista ee baadhitaanka SCID

Hoos u dhaca difaaca jidhku waa jiro khatar ah, taas oo haddii aan la daaween geeri sababi karta.

Ilmahu marka uu dhasho waxa loo soo bandhigaa waalidka in ilmaha laga baadho 23 cudur oo lagu dhasho, lana hideesto, waana muhiim in dawaan loo bilaabo sida ugu dhakhsaha badan. Hadda waxa cilmi-baadhista ay ku soo kordhisay hal cudur oo dheeraad ah, waana hoos u dhaca difaaca jidhka ee caruurta. Cudurkana waxa aanu doonaynaa in lagu soo kordhiyo liiska jirooyinka caruurta dhasha laga baadho.

### Hoos u dhaca difaaca khatarta ah

Hoos u dhaca difaaca jidhka ee khatarta ahi waa cudur dhif iyo naadiir ah kaas oo sababa in ilmahu aanu lahaan qaybo ka mida difaaca jidhka (T-cellene). Haddii aan cudurkan la ogaan oo daaween la bilaabin, ilmahu waxa uu dhintaa sanadka hore ee noloshiisa. Haddiise daaweenta la bilaabo 3-da bilood ee ugu horeeya, jaanis guul oo weyn ayuu ilmahu leeyahay. Cudurkaa hadaan laga baadhin ilmaha marka uu dhasho, waxa ka habsaanta daaweenta, markaasna waxaaba dhasha infakshan nolosha ilmaha khatar geliya.




(sawir-qaade: Jo Michael)

### Baadhitaanka

Cudurka hoos u dhaca difaaca jidhka ee khatarta ah waxa laga ogaan karaa dhiiga shaybaadka ee laga qaado ilmaha marka uu dhasho. Waa dhiig shaybaad oo laga qaado ilmaha cidhibtiisa inta u dhaxaysa 48 ilaa 72 saacadood kadib marka uu ilmahu dhasho, dhiigaasna waxa loo diraa qaybta shaybaadka caruurta ee cusbitaalka guud ee Osl. Shaybaadkani uma baahna in dhiigag dheeraad ah laga qaado ilmaha dhashay. Si baadhitaanka loo sameeyo waa in waalidka ilmaha looga xog waramo shaybaadka. Haddii waalidku markaa doono in ilmahooda laga baadho cudur waa in ay saxeexaan foomka ogolaanshaha.

### Maxaa dhaca marka dhiiga la baado

Marka shaybaadka aan lagu arkin cudurkaa raadkiisa, wax jawaab ah lama siiyo waalidka ilmaha. Hadiise laga shakiyo in ilmahu cudurkaa qabo si dhakhso ah ayaa waalidka dhakhtar ula soo xiriiraa, si baadhitaanka loosii wado. Waxaana sida oo kale la darsaa unugyada la dhaxlo ee hoos u dhaca difaaca jidhka.



(sawir-qaade: OUS)

Dhiiga shaybaadka SCID waxa laga qaadaa dhiiga shaybaadka ee caadiyan ilmahu marka uu dhasho la qaado.

### Intee in le`eg ayaa shaybaadkan lagu kalsoonaan karaa

Marar dhif ah, gaar ahaan caruurta xiligooda ka soo hor mara, waxa mararka qaarkood lagu arkaa raadadka cudurkaa iyada oo ilmahu aanu cudurka aanu qabin. Shaybaadka labaad ayaase taas markiiba cadeeya.

## Ka qayb-qaadashada mashruuca cilmi-baadhista ee shaybaadka SCID

Si loo sameeyo shaybaadkaas waa in waalidiinta ilmaha dhasha ay helaan warbixin ku saabsan cudurka. Waalidiinta raba in ilmahooda la baadho waa in ay saxeexaan foomka loo dirayo waaxda shaybaadka.